

Waa maxay adeegyada TDSB ugu deeqaysaa Barteyaasha Luuqadda Ingiriisida?

- Barnaamijka Kobicinta Akhrista/Qorista Tacliineed (LEAP) ee 36 dugsi hoose iyo 14 dugsi sare oo loogu talagalay ardayda leh aqoon toos ah oo hore oo xaddidanin
- Adeegyo tarjumaad
- Afar Xarumood oo Soo-dhawaynta Soo-galootiga ah, oo siinaya qiimayn hore ardayda soo-galootiga dugsi sare
- Qiimaynta Luuqadda Koowaad (ee in kabadan 40 luuqadood) ee soo-galootiga guushooda tacliineed ay dhici karto inay halis kujirto, ama yeelan kara baahiyo gaar ah
- La rafiiyada shaqaalaha deegaanka goboleed ee dugsiyada si loo kaalmeeyo qoysaska iyo ardayda soo-galootiga



Sideen u taageeri karaa waxbarashada ilmahaayga?

La soco oo caawi ilmahaagu si uu u guulaysto adoo:

- Kala xidhiidhaya macalinka/dugsiga/ilmahaaga shaqadooda iyo horumarkooda
- Xaadiraya Habeenada La-kulan Macalinka iyo Waraysiyada Waalidka iyo Macalinka
- Dib-u-eegaya kalana xaajoonaya kaadhahka warbixinta ilmahaaga iyo macalinkiisa
- Waxa ka baranaya imtixaanka goboleed (EQAO) ee Fasalada 3, 6, 9 www.eqao.com
- dulqaad iyo taageero u muujinaya: barashada luuqad cusub wakhti ayey qaadataal!
- Halaya wargelinaha 15 luuqadood ee sida looga caawiyo ilmahaaga akhrinta, qorista, iyo xisaabta: www.edu.gov.on.ca/abc123/
- U qaadaya ilmahaaga faraca Maktabada Dadwaynaha Toronto ee deegaankaaga

Macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xidhiidh:

Macalinka Ilmahaaga: _____
Dugsiga Ilmahaaga: _____

Ama fadlan booqo Websaaydka TDSB:

www.TDSB.on.ca



Waa maxay taageerada ESL/ELD?

Ardayda badankoodu waxbay akhriyi karaan kuna qori karaan luuqaddooda koowaad markay Canada soo-galaan laakiin waxa dhici karta inay leeyihiin xirfad luuqadda Ingiriisiga oo xaddidan. Barnaamijyada Ingiriisiga Luuqadda Labaad ahaan (ESL) waxay ka caawiyaan ardayda inay bartaan Ingiriisiga si ay si buuxda ugala qaybqaataan manhajka iyo nololaha dugsiyada ardayda Ingiriisiga ku hadasha ee fasaladkooda.



Ardayda hesha taageerada Kobicinta Akhrista/Qorista Ingiriisigu (ELD) waxay soo-galaan dugsiyada Ontario iyagoo leh helis hore ee waxbarashada tooska ah oo kooban. barnaamijyada ELD waxay ka caawiyaan ardaydu inay kobciyaan xirfadaha akhrinta/qorista Ingiriisida. waxay sidoo kale helaan aqoon tacliineed ee maadooyin kala duwan sida xisaabta iyo cilmiga bulshada.

Waa maxay taageerada ESL/ELD ee loo heli karo ardayga dugsiga hoose?

- Barnaamijyo noocyo badan, taageero, iyo kaalmo ayaa loo heli karaa ardayda ESL

- Iyadoo dugsiga ku xidhan, ardaydu waxay heli karaan:

- >Xiisado maalinta badhkeed ah oo gaar ah oo loogu talagalay soo-galootiga

- >Macalimiinta ESL oo goobta jooga kuwaasoo ka taageeraya ardaydu inay Ingiriisida bartaan

- >Socdaalka macalimiinta ESL kuwaasoo taageera ardayda dugsiiyo tiro ah

Ma sii wadi karaa kula hadlidda luuqadayada koowaad ilmahayga?

AAD IYO AAD! Cilmi-baadhis ayaa muujisay in carruurta leh aasaas adag ee luuqaddooda hooyo ay ka kasbadaan guul wayn dugsiga iyo bulshadeena adduunkaba.



Waa maxay taageerada ESL/ELD ee loo heli karo ardayda dugsiga sare?

Shan koorso oo ESL Iyo shan kale oo ELD, oo loogu talagalay iyadoo la eegayo heerka ku fiicnaanta Ingiriisida Iyo koboca akhrinta/qorista, **kuma salayna fasal**,

Koorsooyinka ESL iyo ELD way furan yihiin (waxa loola jeedaa ardaydu way sii wadan karaan ilaa wixii dugsiga sare ka dambeeya oo dhan)

Ardaydu waxay ku beddeli karaan ilaa **saddex** koorso oo ah ESL ama ELD shuruudaha dhibcaha Ingiriisiga khasabka ah ee dibloomadooda Dhibcaha dheeraadka ah ee ESL/ELD waxa loo tirin karaa dhico ikhtiyaareed ee dibloomadooda

Koorsooyinka sida gaarka loola qabsaday taariikhda, sayniska, cilmiga xirfadda, cilmiga xaqa dadka Iyo dawladda, iyo xiisado kale ee khasabka ah



Waa maxay faa'idooyinka barnaamijyada ESL/ELD?

- Ardaydu waxay helaan awoodda ay ku isticmaalaan Ingiriisiga marka dugsiga si ay u kasbadaan guul waxbarasheed

- Ardaydu waxay la soo baxaan awoodda ay ku isticmaalaan ku hadalka iyo qoraalka Ingiriisiga si ay u xidhiidhaan si waxtar leh xaalado kala duwan

- Ardaydu waxay si fiican u awoodayaan inay kaqaybqaataan nololaha bulsho, dhaqaale, siyaasad, iyo dhaqan ee Canada iyo bulshoodaba

- Ardaydu waxay helaan qaddarin sii kordhaysa ee dhaqankooda, taariikhdooda, iyo luuqadooda iyo kuwa kuwa kale

